



**PORLAND
Public Schools**



Cusboonaysiinta Mashruuca Casriyeynta Jefferson ee Janaayo, 2024

Farriintani waxa ay qayb ka tahay taxane cusbooneysiino ah oo joogto ah oo ka socda kooxda Mashruuca Jefferson si ay warbixin kuu siiyan inta mashruuca Casriyeynta Jefferson ay hawshiisu u socoto marxaladdiisa dib u qiimeynta.

Horumarinadii u Dambeeyey

Diisember 2023, Guddida Waxbarashada PPS ayaa amar ku siiyey Xafiiska Casriyeynta Dugsiga inay dib u qiimeeyaan qorshayaasha lagu casriyeynayo Dugsiga Sare ee Jefferson. Qorshe la cusbooneysiyyey ayaa loo soo bandhigi doonaa Guddiga wakhti aan ka dambeyn Abriil 2024.

Sida uu dhigayo go'aanka (ku jira [halkan](#)), qorshahaas la muraajeceeyey waxa uu:

- Ku hayn doonaa ardayda & shaqaalaha inta badan xarunta Jefferson inta uu socdo dhismuhu.
- Koobsan doonaa diiwaangelin arday la bartirmaameedsaday oo ah 1,700.
- Dumin doonaa dhismihii 1909 kii.
- Ku dedaali doonaa in uu waafaqo barnaamijka aagga tilmaamaha waxbarashada dugsiga sare ee hadda ee PPS.
- Ka reebi doonaa goobta la wadaago ee Xarunta Heersarreynta Ardayda Madaw, Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubtan, ama barnaamijyada kale ee aan taabacsaneyn Barnaamijyada Dugsiga Sare ee Jefferson.

Tani waxa ay ka dhigan tahay ardayda Jefferson inay kusii nagaan doonaan Jeff sanad dugsiyeedka xiga iyo ka ku xiga illaa dhismaha la dhamaystiro. Ka eeg [Cusbooneysiinta Mashruuca Jefferson ee Dis. 2023](#) wixii maclumaaad ah ee dheeraad ah.

Maxaa Ka Socda Mashruuca Jefferson Hadda

Kooxda mashruucu waxa ay la kulmeen shaqaalaha Magaalada Portland si ay maclumaaad dheeraad ah uga helaan shuruudaha adeegsiga dhullka. Magaaladu waxa ay siisay maclumaaad ku saabsan laba dhabbo oo suuragal ah oo lagu dumin karo dhismaha 1909:

1. Inay codsadaan inay ka saaraan dhismaha liiska Aagga Maxmiyadda Piedmont
2. Inay codsadaan ogolaansho dumin oo gaar u ah dhismaha 1909.

Kooxda mashruucu waxa ay isku geynayaan macluumaad si ay ula yeeshaan shir Kaalmo Hore oo rasmi ah dabayaaqada Janaayo Magaalada, kaas oo ah tallaabada koowaad ee waajibka ah ee labada dhabbaba.

Kooxaha mashuurca iyo naqshadda ayaa sidoo kale la shaqaynaya qandaraaslayaasha si ay dib ugu eegaan naqshadaha goobeed ee ku haynaya ardayda goobta inta uu socdo dhismuhu. Kooxuhu waxa ay ka fekerayaan kuwa ay yihiin dhismayaasha, kuwa hore u jirey iyo kuwa cusub, ee loo baahan doono si ardayda loo siiyo barnaamijyo akaadeemiyadeed, jimicsi, iyo bulsheed inta dhismuhu socdo.

Cusboonaysiinta mashruuca ee xigta waxa ay soo bixi doontaa horraanta Febraayo. Haddii aad qabto wax su'aalo ama walaacyo ah fadlan naga la soo xidhiidh iimeylka ah JHSBond@pps.net Booqo [websaytka casriyeynta](#) si aad uga hesho wixii macluumaad mashruuca ah ee dheeraad ah.

Kooxda Mashruuca Casriyeynta Jefferson